

Sida loo codeeyo!

1

Akhri bayaannada ku jira lifaaqan ee ku saabsan tartannada aad ka codeynayso.



2

Warqaddaada codbixinta, buuxi goobaabinta ku dhinac taal dookhaaga adigoo isticmaalaaya qalin midab kasta ah.



3

Saxiix bakhshaddaada. Saxixaagu waa inuu u dhigmo saxiixa aan ku hayno diiwaankaaga diiwaan gelinta codbixiyaha si warqaddaada codbixinta loo tiriyo.



4

Warqaddaada codbixinta wakhti hore soo celi. Haddii aad isticmaalayo sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama boostada, wakhti hore codeey!




5

Ka raad-raac warqaddaada codbixinta halka [kce.wiki/TrackMyBallot](#). Waa sida ugu dhaqsaha badan ee aad ku ogaan karto in warqaddaada codbixinta la tiriay, codkaagana la maqlay.



Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah?



Haddii warqaddaada codbixinta ay dhunto ama xumaato, waxaad daabacan kartaa mid beddelaad ah adigoo isticmaalaaya Barnamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka (Online Ballot Marking Program, OBMP). Istimmaalka OBMP, waxaad ku heli kartaa oo aad daabacan kartaa warqad codbixin beddelaad ah adigoo jooga guriga, maktabadda, ama meel walba oo ku habboon.


OBMP waxaa loogu talagalay inuu u oggolaado codbixiyeyaasha naafada ah, oo ay ku jiraan kuwa indhooleyaasha ah ama uu araggoodu hooseeyo, inay warqaddooda codbixinta si qarsoodi ah u calaamadaystaan. Waxaa heli kara dhammaan codbixiyeyaasha diiwaan gashan.



Sida loo istimmaalo Barnamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka

- Tag halka [kingcounty.gov/elections/obmp](#).
- Macluumaaqdaa gelo foomka.
- Ku calaamadee dookhyadaada warqadda codbixinta oonleenka oo ka dibna daabac warqaddaada codbixinta ee aad buuxisay.
- AMA
- Daabac warqaddaada codbixinta oo ka dibna gacanta ku calaamadee.
- Hubi in warqaddaada codbixinta si sax ah aad u calaamadaysay.
- Ku soo celi warqaddaada codbixinta sida caadiga ah, halka sanduuqa lagu rido warqadda codbixinta ama aadoo soo marsiinaaya boostada.
- Lagacta boostada looma baahna haddii aad isticmaasho xaashida lifaaqa bakhshadda ee la socota marka aad daabacayso warqaddaada codbixinta.

Haddii aad u baahan tahay caawinaad dheeraad ah ama hab kale oo aad u dhiibato warqaddaada codbixinta, fadlan la xiriir xafiiskeena halka 206-296-VOTE (8683).



Yaa deeq ku bixiya ololeyaasha?

Eeg ku-deeqyeasha musharaxiinta iyo cabbirrada sharciga:

Guddiga Kashifaadda Dadweynaha

www.pdc.wa.gov | Wicitaanka Lacag La'aanta 1-877-601-2828

Doorashada Gaarka ee Febraayo 2025

Degmada King Buug-yaraha Codbixiyeyaasha Deegaanka ee Rasmiga ah

sida ay codsadeen Maamul Goboleedka Dab-damiska Waaxda Dab-damiska ee Shoreline ee La Soo Jeediay



Saxiixo si aad u hesho digniimaha warqadda codbixinta!

Hel qoraallo taleefan ama iimeelyo ah marka warqaddaada codbixinta la sii habeynaayo oo la tiriyo. Iska qor halka [kce.wiki/TrackMyBallot](#).

Is diiwaan gelo si aad u codeyso



Oonleenka: Booqo [VoteWA.gov](#) si aad oonleenka iskaga diiwaan geliso oo aad u codeyso. Wakhtiga kama dambeyta ah ee is diiwaan gelinta oonleenka ee Doorashada Gaarka ah ee Febraayo waa Febraayo 3.



Boostada: Ka soo degso oo daabaco foomka diiwaan gelinta halka [kce.wiki/VoterReg](#) oo boostada ugu dir Doorashooyinka Degmada King: 919 SW Grady Way, Renton, WA 98057. Waa in la helaa ugu dambeyn Febraayo 3.



Shakhsaahaan: Wuxaad shakhsaahaan iskaga diiwaan gelin kartaa halka xarunta guud ee Doorashooyinka Degmada King ilaa iyo Febraayo 11, Maalinta Doorashada. Wixii macluumaa dheeraad ah oo ku saabsan saacadaha iyo adeegyada waxaad ka heli kartaa halka [kingcounty.gov/elections](#).

Nala soo xiriir si aad u hesho buug-yarahaan oo qaab kale ah.

Contact us to receive your voting materials in Chinese, Korean, Russian, Somali, Spanish or Vietnamese.

如需獲取您的中文投票資訊，請與我們聯絡。

한국어로 투표 자료를 받으시려면 저희에게 연락하세요.

Свяжитесь с нами, чтобы получать материалы для голосования на русском.

Nala soo xiriir si aad u hesho agabkaaga codeynta oo ku qoran Af-Soomaali.

Comuníquese con nosotros para recibir sus materiales de votación en español.

Xin vui lòng liên lạc với Sở Bầu cử Quận King để nhận tài liệu bầu cử bằng tiếng Việt.



Barro wax dheeraad ah oo ku saabsan sanduuqyada lagu rido, xarumaha codbixinta, iyo in ka badan!



Waxaan halkaan u joognaa in aan caawino!

Shaqaalaha doorashooyinka ayaa kaa caawini kara inaad is diiwaan geliso oo aad hesho warqad codbixin cusub ilaa iyo Maalinta Doorashada. Ma u baahan tahay warqad codbixin beddelaad ah oo ma rabtaa inaad si gaar ah u calaamadayso warqaddaada codbixinta? Ka hel warqaddaada codbixinta oonleenka barta [kingcounty.gov/elections/obmp](#) si aad uga faa'iidaysto Barnamijka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta ee Oonleenka.

Warqaddaada codbixinta waxaa ku duuban macluumaa muhiim ah oo ku saabsan sida loo soo celiyo warqaddaada codbixinta, helitaanka caawinaadda, iyo wax dheeraad ah. Iska xaqiiji inaad lifaaqa warqaddaada codbixinta ka eego:

- Shanta sanduuq ee lagu rido warqadda codbixinta ee kuugu dhow
- Halkee laga heli karaa caawinaad shakhsaahaan
- Sida loo daabaco warqaddaada codbixinta haddii taada lunto ama burburto.

206-296-VOTE (8683)
elections@kingcounty.gov
kingcounty.gov/elections

Baraheena Bulshada
@kcelections
[f](https://www.facebook.com/KingCountyElections) [i](https://www.instagram.com/KingCountyElections/) [in](https://www.linkedin.com/company/king-county-elections/) [y](https://www.youtube.com/@KingCountyElections)

King County
Elections

codeyn!

Maamul Goboleedka Dab-damiska Waaxda Dab-damiska ee Shoreline ee La Soo Jeediay

Soo Jeedinta Lr. 1

Waaxda Dab-damiska ee Shoreline iyo Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada King Lr. 16 d/b/a Waaxda Dab-damiska ee Northshore ayaa hirgeliyay Qaraar Wadajir ah oo ansixinaayo Qorshaha Maamul Goboleedka Dab-damiska Waaxda Dab-damiska ee Shoreline ("Qorshaha") oo abuuraaya Maamul Goboleed Dab-damis ("RFA"), oo dhaqan galaaya May 1, 2025.

Soo jeedintaan ayaa ansixin doonta Qorshaha lagu abuuraayo Waaxda Dab-damiska ee Shoreline RFA si ay u bixiso ilaalinta dabka iyo adeegyada caafimaadka degdegga ah ee lagu maalgeliyo canshuurta hantida oo ah \$0.70 ka mid ah kunkii ee qiimeynat la qiimeeyay ee sannadka 2025 (oo aanan ka badnaan doonin \$1.00 kunkii sannadaha ku xiga) iyo kharashka dheefta dab-damiska oo lix sanno ah (oo aanan ka badnaan doonin 60% ee miisaaniyadda hawlgalka). Maalgelinta waxay beddeli doontaa canshuuraha hantida ee hadda jira iyo kharashyada dheefta dab-damiska ee ay Degmooyinka ururiyaan.

Ma tahay in la ansixyo Qorshaha lagu abuuraayo Maamul Goboleedka Dab-damiska Waaxda Dab-damiska ee Shoreline?

Haa

Maya

*Qoraalka buuxa ee cabbirkana ayaa laga heli karaa Xafiiska
Doorashooyinka ama oonleenka barta kingcounty.gov/elections.*



Waxaad u codeynaysaa
Haa ama Maya
ee ansixinta Soo Jeedinta. 1

Shuruudaha ansixinta: 60% ansixin (RCW 52.26.050 and 52.26.060)

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Bayaanka sharaxaadda

Ka dib tobanaan sanno oo iskaashi ah si loo bixiyo adeegyada caafimaadka dabka iyo degdegga ah ee bulshooyinka Shoreline, Lake Forest Community, iyo Kenmore, Guddiyada Guddoomiyeyaasha Waaxyada Dab-damiska ee Shoreline iyo Degmada Ilaalinta Dabka ee Degmada Lr. 16 d/b/a (oo magac ahaan u shaqeysa) Waaxda Dab-damiska Northshore ayaa si wadajir ah u diyaariyay oo ansixiyay qorshe si rasmi ah loogu abuuraayo laguna midaynayo dabka, badbaadinta, iyo hawlahaa caafimaadka degdegga ah ee labada Degmo ee Dab-damiska isugu keenaaya Maamul Goboleed Dab-damis ("RFA") ee hoos yimaada cutubka 52.26. RCW.

Haddii codbixiyeyashu oggolaadaan Soo Jeedinta 1, Waaxyada Dab-damiska ee Shoreline iyo Northshore waxay abuuri doonaan Waaxda Dab-damiska ee Shoreline Maamul Goboleedka Dab-damiska (SHFD) sida RFA ahaan oo dhaqan galaaya May 1, 2025. SHFD waxa ay ka hoos shaqeyn doontaa guddi maamul oo ka kooban toban xubnood oo xubnaha maamulka ah, oo ay markii hore buuxiyeen Guddoomiyeyaasha Dab-damiska ee xilka haya ee labada degmo ee dab-damis.

SHFD waxa lagu maalgelin doonaa kharashka dheefta dab-damiska, iyo canshuurta hantida oo aan ka badnay \$.70 kunkii qiimeynat la qiimeeyay in la qaado 2025 lana ururiyo 2026. Canshuurta hantida SHFD iyo kharashka dheefta dab-damiska waxay beddeli doontaa canshuuraha ee canshuurta hantida ee caadiga ah iyo kharashyada dheefta dab-damiska ee hadda jira ee Waaxyada Dab-damiska ee Shoreline iyo Northshore.

SHFD waxaa loogu talagalay in lagu wanaajyo heerarka adeegga ee dhammaan saddexda bulsho, abuurto waxtarka maaliyadeed iyo saadka iyo keydinta, iyo hubinta matallaadda juqraifiyadeed ee maxalliga ah ee guddiga maamulka RFA. RFA ayaa laga hadlay sannado badan, waxayna fursad siisaa hagaajinta adeegga degdegga ah, waxayna sidoo kale taageeri doontaa sii jiritaan wakhti dheer waxayna u oggolaan doontaa fursadaha iskaashiga mustaqbalka. Si aad u aragto Qorshaha RFA oo dhammaystiran, fadlan booqo: <https://shorelinefire.com/news/regional-fire-authority-ballot-measure>.

Wixii su'aalo ah ee aad ka qabto cabbirkana, la xiriir:

Matt Cowan
Taliyaha Dab-Damiska
(206) 533-6510
mcowan@shorelinefire.com

Maamul Goboleedka Dab-damiska Waaxda Dab-damiska ee Shoreline ee La Soo Jeediay

Charlie Kimball, Jon Culver, Evan Voltsis
yesrfa.org

Deganeyaasha, hoggaamiyeyaasha bulshada, dab-damiska iyo khubarada badbaadada dadweynaha ee Shoreline, Kenmore iyo Lake Forest Park waxay taageero xooggan u hayaan Soo Jeedinta 1, Maamul Goboleed Dab-damis (RFA). Soo Jeedinta 1 waxa sii xoojinaysaa xiriirkira jira ee ka dhixeyya Waaxyada Dab-damiska ee Shoreline iyo Northshore Waaxda. Waxay hoos u dhigi doontaa kharashaadka, hagaajinta hawlgallada, iyo taageeridda dab-damiyeyaasheena si ay u sii wadaan bixinta adeegyada dab-damiska iyo caafimaadka degdegga ah ee heerka sare.

Dab-damiska Shoreline iyo Northshore waxay si guul leh u wada shaqeynayaan tobanaan sanno. Laga bilaabo 2022, waxay bilaabeen inay si rasmi ah u wadaagaan shaqaalaha iyo agabka qandaraaska, taas oo loo arkay guulo waaweyn. RFA waa tallaabada xigta ee dabiiciga ah waxaana si gaar ah loogu talagalay in lagu bixiyo heerar horumarsan oo badqabka dadweynaha ah oo qiimo jaban oo loogu talagalay deganeyaasha. Intaa waxaa dheer, RFA waxaa maamuli doona wakiillo ka socda bulsho kasta oo ku nool RFA, iyadoo dhammaan magaaloooyinkeena siinaya cod ku saabsan sida adeegyadeena dab-damiska loo maareeyo.

Guud ahaan, RFA waxay guul-guul u tahay bulshada iyo dab-damiyeyaasheena. Wuxuu si xushmad leh ku codsanaynaa taageeradaada: Ku codee Haa ee ku aaddan Soo Jeedinta 1!

Taageerooyinka La Xushay: Senatarrada Gobolka Derek Stanford, Jesse Salomon; Wakiillada Gobolka Cindy Ryu, Davina Duerr, Lauren Davis, Shelly Kloba; Xubinta Golaha Degmada King Rod Dembowski; Xubnaha Goleyaasha Magaalada ee Kenmore iyo Lake Forest Park; Ururka Dab-damiyeyaasha Shoreline 1760; Dimuqraadiyiinta Degmada Sharci Dejinta 1-aad.

Beeninta bayaanka looga soo horjeedo

RFA waxay keentaa wax la awoodi karo, adeegyo la wanaajiyey, iyo xakamaynta deegaanka. 100% mulkiileyaasha guryuhu waxay arki doonaan hoos u dhac ku yimaada heerkooda canshuurta, wadaagga kheyraadka ayaa wanaajin doonta heerarka adeegga, magaalo kastana waxa ay matali doontaa guddiga RFA. Qaraar ahaan, heerka canshuurta ee 2026 waxaa lagu dejiyay \$0.70, iyo sharciga Gobolka ayaa ku xaddida kordhiimaha 1% sannadkii.

Iyada oo lagu sii dhisaayo guulaha la xaqiijiyay ee heshiiska hadda jira, Soo Jeedinta 1 ayaa ku guuleystay taageerada bulshada oo baahsan. Adeeg gaar ah, oo la awoodi karo, Ku Codee Haa!

Doorashooyinka Degmada King ma saxaan astaamaynta, naxwaha, ama hubinta-xaqiqa ee musharaxa iyo bayaannada cabbirka.

Bayaanka looga soo horjeedo

David Maehren, Paul Hess, Jeff Dairiki
no-rfa.info

Nidaamka Hadda Si Wanaagsan ayuu u Shaqeeyaa. Haddaanay jabsanayn, ha hagaajin. Ma jiro Wax RFA ay samayn karto oo Degmooyinka Dab-damiska aysan horey u samayn karin. Marka la sameeyo ma jirto waddo macquul ah oo dib loogu noqdo. Wuxuu lumin doonaa xakamaynta maxalliga ah. Maanta waxaa jira sinnaan. Degmo kastaa waxay bixisa kharashka adeegyada ay hesho. Waxtarka iyo keydinta kharashka isugaynta ayaa mar hore lagu xaqiisaday heshiiska adeegyada Northshore/Shoreline ee hadda jira. Hal maamul, hal koox shaqaale, hal siyaasad iyo tababar.

Ma Jiraan Wax Keyd Ah Ama Horumarin Adeeg Ah Oo Dhab Ah. Dhimmista canshuurta la soo jeediay waxaa lagu gaaraa iyadoo la kharash gareeyo miisaaniyadda keydka. *Khatar!* Qorshaha RFA wuxuu kordhin doonaa Oggolaanshaha Canshuurta laga bilaabo 70¢ ilaa \$1.00 ee \$1,000 ee Qiimeyn La Qiimeeyay ee 2026. Qandaraaska hadda jira ee Northshore/Shoreline wuxuu ku qasbay Shoreline inay bixiso adeeg heer sare ah iyo xakamaynta kharashaadka. Faa'iidooyinkaan waa la waayi doonaa haddii la hirgeliyo RFA. Wax adeegyo dheeraad ah laguma darin oo la socda RFA.

Waayitaanka Xakamaynta Deegaanka. Hadda, degmo kastaa waxay dejisa heerkeeda adeegga, heerka canshuurta waxayna leedahay lahaanshaha hanti iyo lacagaha keydka ah. RFA waxay soo rogtaa xal ah in hal cabbir ay ku dhaqmaan dhammaan. Magaaloooyinkeena waxaa loo sameeyay inay ku dhaqmaan xakamaynta deegaanka oo u adeegaya baahiyaha gaarka ah ee bulshadooda. Maxaa taas hadda looga tanaasullay? Ma jirto sabab sax ah oo loo sameeyo isbeddel.

Beeninta bayaanka lagu taageerayo

Waxaan taageersanahay dab-damiyeyaasheena. Tani waxay ku saabsan tahay maamulidda, maahan baahiyada dab-damiyeyaasha. Toddoba ka mid ah tobanka guddoomiye waxay leeyihii xiriiryo ku aaddan adeegga dab-damiska: Laba ayaa hadda ah dab-damiyeyaal firfircooni, Saddex hore u ahaa dab-damiyeyaasha Shoreline, laba xaas oo Taliyeyaal Dab-damis hore ee Shoreline. *Yaa matalaya danaha shacabka?* Ma jiraan faa'iidooyin la taaban karo oo ay RFA leedahay, waxay keliya leedahay khatar iyo canshuuro sare. Taageerooyin? -Syaasiyiinta ayaa jecleny inay ka hor yimaadaan danaha dab-damiyeyaasha. Kani waa Boondoggle qadiimi ah. Macno la'an, laakiin siinaya muuqaal ah wax qiimo leh. Fadlan ku Codee Maya!